

# Raac dhaqamada ugu wanaagsan markaad ciyaalka birta suunka u xireyso

Waaxda Caafimaadka ee North Dakota waxey bixisaa dhaqamada ugu wanaagsan marki ciyaalka lagu safrinayo baabuurta:

**Ilmaha ka yar 13 sanno waa in la saaro kursiga dambe.**

**Gadaal u Jeedsii** Ilmaha waa in loo sii jeediyo xagga dambe ee baabuurka illaa ugu yaraan da'da 2 sanno.

*Laba nooc oo ah kursiga baaburt oo gadaal loo sii jeediyo ayaa la heli karaa:*

**Kursiyada Ilmaha Yaryar** — Badi kursiyadan waa la isticmaali karaa illaa miisaan ilmo oo ah 22-35 rodol. Isticmaal ilaa xadka cabirka ugu sareysa ama ilaa madaxa cunuga uu ku simanyahay hal taako korka kursiga.

**Kursiyo la bedeli karo** - Kursiyadan waxa loo isticmaali karaa gadaal u jeedin iyo hore u jeedin. Badi waxa loo isticmaali karaa gadaal u jeedin illaa miisaan ilmo oo ah 30-40 rodol. Gadaal u jeedin u isticmaal ilaa xadka cabirka ugu sareysa ee uu ogolyahay soo saaraha.

**Hore u Jeedsii** Marka ilmuhu gaadhaan ugu yaraan 2 sanno ama ka weynaadaan xadka gadaal u jeedka ee ugu sareeya ee kursigooda baabuurka, waxa la saari karaa kursiga hore u jeediyo oo leh suunka xajinta. Kursiga gadaal u jeedin u isticmaal ilaa xadka cabirka ugu sareysa ee uu ogolyahay soo saaraha. Kursiyada ilmaha ee baabuurka ee leh suuman xejin waxa la isticmaali karaa illaa miisaan ilmo oo ah 40-100 rodol.

**Kursi caawiye** Marka caruurta ka weynaadaan suumanka xejinta ee kursigooda hore u jeedo ee ilmaha baabuurka lagu saaro, waxaa lagu wareejin karaa kursi caawiye. Waa in ilmuhu yahay ugu yaraan 40 rodol oo uu jiro ugu yaraan 4 sanno. Cunuga ku haay kursi caawiyaha ilaa itaalka 4'9" ama ilaa suunka kursiga si sax ah uu la ekaanayo jirka cunuga korkiisa. Badi kursiyada caawinta waxa la isticmaali karaa illaa miisaan ah 80-120.

**Suunka Kursiga** Marki ilmaha ka weynaadaan kursi caawiyaha, waxey isticmaali karaan suunka kursiga marki ay si sax ah ula ekaadaan jirka. Si suunka kursiga si haboon ula ekaado, suunka dhabta waa waajib inuu si adag u yaalo guud ahaan bowdayaha kore iyo garbaha iyo xabadka. Ma aha inuu dul saarnaado caloosha ama gudub u marsan yahay qoorta.

## **TALOOPYIN MUHIIM AH:**

- Dooro kursiga baabuurka oo ku salysan da'ada, cabirka, horumarka iyo qaangaarka cunugaaga. Macluumaadka cabirka waxey ku yaalaan calaamado ku dhagan kursiga baabuurka iyo buugga tilmaamaha.
- Ku hubso cunuga kursiga si adag, adigoo raacayo tilmaamaha kursiga baabuurta.
- Ku rakib kursiga baabuurkaaga si fudud adigoo isticmaalayo suunka kursiga AMA xajiyayaasha hoose iyo nidaamka qoolka (LATCH). Raac tilmaamaha kursiga baabuurka iyo buugga mulkiilaha baabuurka.
- Ka diiwaangali baabuurkaaga soo saaraha, hubso kusoo celinta lana soco taariikhda uu dhacayo kursiga.

Ha xaqiijiyo kursiga baabuurka ee cunugaaga ama kursi caawiyaha mid kamid ah farsamo yaqaanada badan ee ku takhasusay amaanka rakaabka ciyaalka ah kuwasoo laga heli karo guud ahaan gobolka. Si aad u hesho farsamo yaqaanka amaanka rakaabka ciyaalka ah, la xiriir Waaxdar Caafimaadka ee North Dakota, Barnaamijka Amaanka Rakaabka Ciyaalka 800.472.2286, booqo bogga [www.ndhealth.gov/injury/](http://www.ndhealth.gov/injury/) or visit <https://www.safercar.gov/>, dooro kursiga baabuurka (car seats).

# Sharciga Amaanka Rakaabka Ciyaalka ee North Dakota



- Ilmaha ka yar 8 sanno waxaa looga baahanyahay iney raacaan ilmo xajiye (kursiga baabuurka ama kursi caawiye). Xajiyaha waa in si sax ah loo isticmaalaa- iyadoo la raacayo tilmaamaha soo saaraha.
- Suunka kursiga ee sida haboon loo isticmaalay waa loo bedeli karaa ilmaha ka yar 8 sanno itaalkoodana uu yahay ugu yaraan 4'9".
- Ilmaha da'adooda u dhaxeeyso 8 ilaa 17 waa in sida haboon loogu habsadaa suunka kursiga ama ilmo Xajiyaha (kursiga baabuurka ama kursi caawiyaha).
- Ilmaha ka yar 18 sanno waa in sida haboon loo ilaaliyaa iyadoo aan loo eegin meesha ka fadhiyaan baabuurka.
- Ciqaabta ku xadgubka sharcigan waa \$25 iyo hal darajo oo ah hoos u dhigid xagga laysanka gaari kaxeeynta. Darawalka wuxuu mas'uul ka yahay xaqijinta xamuulka oo idil qabaan suunka birta ee xakameynta haboon.

*Si aad isaga caawiso doorashada xakameynta ugu saxan ee cunugaaga, tixraac tilmaamaha dhaqamada ugu wanaagsan ee gadaal.*